



# Talooyin Loogu Talagalay Dadka Leh Baahiyo Caafimaad

Marka masiibo dhacdo, dadka leh baahiyo caafimaad oo gaar ah waxay qaabaan walaacyo dheeraad ah. Macluumaadkani waxa uu adiga iyo qoyskaaga ka gargaari doonaa isu diyaarinta xaalad degdeg ah.

## Dawooyinka

- Markasta hayso ugu yaraan kayd ah dawooyinkaaga oo dhan oo kugu filan saddex maalmood. Marka ay jiraan xaaladaha degdegga qaarkood, sida hargab faafay, waxa laga yaabaa inaad u baahatid inaad isu diyaarisid hal todobaad ama ka badan.
- Dawooyinkaaga ku kaydi hal goob iyaga oo ku jira weelkooda asal ah.
- Hayso liis ah dhammaan dawooyinkaaga: magaca dawada, qadarka qaadashada, inta jeer ee la qaadanayo, iyo magaca dhakhtarka qoray.

## Kaydka dawooyinka

- Hayso kayd dheeraad ah oo ah saddex maalmood oo ah alaab caafimaad oo kasta oo aad isticmaashid, sida faashado, bacaha goob saxaro-saarid (ostomy bags) ama siringeyaal/irbado.

## Qalabka caafimaad ee koronto ku shaqeyta

- Dhammaan qalabka caafimaad ee u baahan koronto — sariiro, qalabka neefsashada, ama bambooyinka ku shubista (infusion pumps) — weydii shirkaddaada bixinta qalabka caafimaadka oo hel macluumaad ku saabsan il koronto oo kayd ah sida baytari ama koronto-dhaliye.

## Oksijiinta iyo qalabka neefsashada

- Haddii aad isticmaashid oksijiin, hayso kayd loogu talagalay kediska ama degdegga (oo kugu filan ugu yaraan mudo ah saddex maalmood).
- Waa in taangiyada oksijiinta si ammaan ah ama sagan loo xidho si aanay u soo dhicin. Wac shirkaddaada alaabta caafimaadka si aad u heshid macluumaad ku saabsan fariimaha xidhista ama adkeynta.
- Haddii aad isticmaashid qalabka neefsashada, hayso kayd ah saddex maalmood ama ka badan oo ah tuubo, milan ama hoore iyo dawooyin.

## Xidid-gale (IV) iyo qalabka quudinta

- Waa inaad ogaatid in bambadaada shubistu leedahay baytari kayd ah, iyo inta uu kuu shaqeyn doono marka ay jirto xaalad degdeg ah.
- Bixiyahaaga daryeelka guriga ah weydii tabaha shubista ee gacanta lagu sameeyo haddii korontadu go'do.
- Fariimo ku saabsan habka shaqeynta ha lagu dhejiyo dhammaan qalabka.

## Boorsada degdegga

- Si aad ugu talogashid haddii ay dhacdo inay qasab kugu noqoto inaad ka baxdid gurigaaga, wakhti kasta hayso boorso aad ku gurtay alaab oo ay ku jiraan:
  - Liiska dawooyinka.
  - Kayd dawooyin oo ah ugu yaraan saddex maalmood.
  - Koobiyada waraaqaha caafimaadka ee muhiimka ah sida caymiska caafimaadka.

## Dadka ku gargaari kara

- Qoyska, saaxiibada iyo deriska oo aad wax la qorsheysatid ayaa qayb muhiim ah ka ah isu diyaarinta masiibo. Garo cidda u soo lugeyn kartaa gurigaaga si lagu gargaaro haddii hab gaadiid oo kale aan la heli karin.
- Qorsheyaashaada masiibada kala hadal bixiyahaaga daryeel caafimaad oo ah guriga.
- Weydii waaxda dab-damista ee degmadaada haddii ay kaydsadaan liiska dadka leh baahiyo caafimaad oo gaar ah; weydiiso in lagugu daro haddii ay haystaan liiskaas.
- Meel dhow ha kuu yaalo liiska dad lala xidhiidhi karo oo ku gargaari kara.



PO Box 47890  
Olympia, WA 98504-  
7890

Bogga Internetka:  
[www.doh.wa.gov](http://www.doh.wa.gov)

360-236-4027  
(800) 525-0127

DOH Pub 821-006  
Somali